# Warqadda-xubinta 2021 – sanadka ey SIF buuxineeyso 100 sano!

Kharashka xubinimada- iyo howlaha ee sanadka 2021 waxaa lasoo diri doona gudaha usbuuca 7 waxaana la iska rabaa in la bixiyo 2021-02-28. Nambarka bankigirada iyo nambarka OCR ka waa **waajib** in la siticmaalo marka lacagta la bixinayo si looga diiwaan geliyo in uu xubintu bixisay lacvagta nidaamka xubingta. Si aad ugu fogaato xasuusin fadlan bixi lacag waqti fiican.

Dhammaan xubnaha ku heysta cinwaan- iimeyl diiwaanka xubinta ee laget.se waxey ku heli donaan faktuuradooda iimeeyl ahaan. Haddii kale fakturada waxeey ku imaaneysaa warqad ahaan.

**Billogram**
Faktuurada bixinta kharashka xubinta – iyo howlaha waxaa sameeynaya shirkadda Billogram kaasoo wadashaqeeyn la leh laget.se taasoo Skene IF ay heeysato diiwaanka xubinta. Khidmadaan waxey dardar gelineysaa shaqada labadaba Skene IF iyo hogaamiyiyaasha oo si fudud ayagoo isticmaalaya app taleefankooda ay ku arki karaan qofka bixiyey kharashkiisa kooxda.

Kharashka ay qaadanayaan Billogram ee howsha ay qabanayaan ee faktuurada waa 10 kr faktuuradiiba markii iimeyl lagu diraayo, haddii lagu diraayo warqad ahaana waa 20 kr faktuuradii. Haddaad heshay faktuuradaada sanadkii hore warqad ahaan, laakiin aad heysato iimeeyl shaqeynaya, fadlan usoo iimeeyl gareey cinwaanka eemeeylka ee kansliet@skeneif.com

Dhammaan ciyaaryahanada ee Skene IF waa in ay bixiyaan kharashka xubinimada iyo howsha si ay ugu qeeyb qaataan tababarka, tartanada ama koobabka.

**Ceeymiska ciyaaraha**
Waxada heleysa dhaqtar ku taqasusay dhawacyada ciyaraha oo bilaasha ah. Ciyaryahan waxa uu ceymis kaga jiraa Folksam ayadoo lomarayo ururka markii sibuuxdo loo bixiyo kharashka xubinninmada iyo howsha. Ceymiska waxuu siinayaa difaac aasaasi ah oo fican haddii uu ciyaryahan uu la kulmo dhawac inta uu tababarka ku jiro, ama tartan ama kooba.

Ceymiska waxaa kaloo kujira khidmada “Råd och Vård för idrottsskador” (Talooyin iyo daryeelid loogu tala galay dhaawacyada isboortis). Midaas waxey utahay bilaasha ciyaar yahan ceymis kujira. Halkan qofka waxuu u wacayaa si uu ulahadlo tababare jimicsi si looga hortago, loola tacalao iyo loo wargeliyo dhawacyada ciyaraha. Tababaraha jimicsiga waxuu go aminayaa haddii lobahanyahay daryeela ku sabsan dhawaca ciyarha waxuu kaloo u qabanayaa xaladahaas ciyaryahanka boqosho lacag la ana ahan oo uu lakulmayo tababare jimicsi ama dhaqtar ku taqasusay dhawaca ciyaraha. Wac 020–441111 malmaha cadiga ah 8.00-17.00.
*Muhiim- laxiriira marka hore qeybta xogheynta si aad u hesho nambar oo aad ku qasbantihiin inaad sheegto marka aad waceyso Folksam. Marka ey saas tahay waxey galeysaa xog-haynta diiwaanka xubinta waxeyna fiirinayaan in ciyaaryahanka uu yahay xubin.*

**Kharashka xubinta 2021**
Keli: 300 kr.
Qoys: 600 kr *(dhamaan xubnaha qoyska waa ay ku jiraan).*

**Kharashka howlaha 2021**
350 kr: PF-14, F-12/13, P-12/13.
450 kr: P-11, P-10, F-10/-11.
550 kr: P-09, F-09
650 kr: P-08, P-06/-07, U19

***FG - faktuuro kasto ubixi iskeed*.** Haduu qoyska doortay xubin-nimo qoyska markaas waxaa imanaya faktuuro xubin-nimada qoyska oo dhan. Qarashka howsha waa shaqsi waxeyna raaceysaa ciyaryahanka sidaa darteed asaga/ayada ayey u imaneeysaa. Faktuuro kasta waxey heysataa nambar OCR u gooni ah oo ay qasabtahay in la isticmalo marka labixinayo, sidaas darteed ayey qasabtahay in faktuuro kasto loo bixiyo iskeed.

**Ugargaar naadiga adiga oo dooranayo xubinnimo qoys**

Deeqda ururka waxuu ku saleysanyahy badanaa tirada xubnaha. Haddaad heystaan labo xubin oo katirsan naadiga qoyskiina waxaan idinkula talinneynaa inaad doorataan xubin-nimo qoys. Markaas dhammaan qoyska waxey noqonayaan xubno halqiimo markaasna waxaada u gargareysaan naadiga madamo ey kordhayaan tirada xubnaha. Dabcan waxaan ku dhiirigalineynaa xitaa dhammaan qoysas kale in ay dortaan qaabkan xitaa haddad haysataan hal xubin oo kaliya.

Haddaad rabtaan xubinimo qoys u dir iimeeyl xoog-heynta **kansliet@skeneif.com** markaasna dhiib warbixintaan dhammaan xubnaha qoyska oo dhan:

- Magaca
- Cinwaan
- Tobonka nambar ee qofka oo dhameystiran
- Moobiil *(haddii uu jiro)*
- Cinwaan Iiimeeyl *(haddii uu jiro)*

**Warbixin ka socoto:**
**MAJBLOMMAN**
Markii ay jirto baahi kaalmo dhaqaale waxaa jirto fursad aad kaga codsan karto adigoo sii marayo Majblomman. Waxey jireen tan iyo 1907 ayagoo u taagnaa carruurta Iswiidhan kuwaasoo u baahan kaalmo sababo kala duwan dartood. Baahida waxey isla badashay waqtiga, oo maanta waxey u qeeybiyaan taageero dhaqaale carruurta qoysaska ay heeysato dhaqaalo xumo. Waxey ahaan kartaa lacag loogu soo iibiyo tusaale ahaan kabo banooni, xaflad carruur, bushkuleeti, jaakat ama kharashka xubinimada- iyo howsha ee ururka cayaaraha.
Guji bnoggaan hoose si aad u hesho foomka codsiga:
https://majblomman.se/sok-stod/sok-har/

**Howsha iibinta xilliga guga 2021**
Xanuunka safmareenka dartiis waxey ku qasbaneed ururka in uu joojiyo nashaadka 2020 sidaas darteed ayaa waxaa meesha ka baxay il dakhli oo muhiim ahaa. Lakiin ururka ma aheyn mid fadhiid ah ee isla markiiba waxa uu bilaabay in uu raadiyo ilo kale ay wax kasoo galaan. Iibinta bakhtiiyo nasiibka ayaa waxey noqotay mid aad muhiim ugu ah dhaqaalaha ururka welina u ah. Gugii hore waxey noqotay Skene IF mid ay u doortay Folkspel 1 ka mid ah 12 naadi oo ka jira Västra Götaland kuwaasoo helay fursads in ay iibiyaan bakhtiyoo nasiib 50% ayeyna u heleen khidmad. Folkspel waxey na siisay hadaf iibin kasoo khuseeya Bingolotter iyo Sverigelotter ayada oo ay caawinayaan kooxa oo dhan waxaan gaarnay hadafkii sidaad darteed ayaan sanadkaana u helnay isla fursadaas. Warbixin badan oo ku saabsan nashaadka iibinta ee guga m ar dhow ayuu soo bixi doonaa.

Salaan naxariiseed salaankubbad
***Christine Johansson***
Naadi maamule

SKENE IF
Taleefan: 0320-408 58
kansliet@skeneif.com
Dalsängsgatan 4, 511 63 Skene

www.skeneif.com
www.facebook.com/skeneidrottsforening
www.facebook.com/marten.skene
Instagram: #skeneif